

Helsinki

# Ku soo dhawoow dugsigiga

Xog ku socota waalidiinta ardayda fasalka koobaad  
Sanad dugsiyeedka 2024–2025



# Taariikhaha muhiimka ah

## 13 Nufeembar 2023–15 Janaayo 2024

Dugsiga ayaa munaasabado u qaban kara waalidiinta. Ka fiiri xog dheeri ah oo ku saabsan taariikhaha iyo wakhtiyada webseedyada dugsiga barta [hel.fi/peruskoulut/en](https://hel.fi/peruskoulut/en).

## 8–28 Janaayo 2024

Diiwaan gelinta onlaynka ah ee dugsiga oo barta asti.hel.fi. Ogeysiisyada waxbarashada muhiimka ayaa lagu soo dhajin doonaa ciwaanka guriga ilmaha laga bilaabo 3 Janaayo 2024 iyo wixii ka danbeeya. Haddii codsigu u baahan yahay dhammaan ogolaanshaha waalidiinta, ogolaansho waa in la baxshaa ugu danbayn 28 Janaayo marka mudada diiwaan gelintu dhammaato.

## 15–31 Janaayo 2024

Maamulaha dugsigu wuxuu ku casuumayaa ardayda mustaqbalka ee fasalka koobaad iyo waalidiinta dhageysi quseeya go'aanka waxbarashada baahiyaha gaarka ah marka waxbarashada baahiyaha gaarka ah la diyaariyo ayadoo qayb ka ah waxbarashada guud ama casharka baahiyaha gaarka ah ee dugsiga maxaliga ah.

## Arbacada 24 Janaayo 2024 marka ay saacadu tahay 8.00–10.00

Diiwaan gelinta dugsiga ee dugsiga maxaliga ah ee ardayga. Fadlan la imoow ogeysiiska waxbarashada qasabka ah.

## Isniinta 29 Janaayo 2024 iyo kadib

Haddii qoyskaagu u guuro Helsinki kadib marka mudada diiwaan gelintu dhammaato, la xiriir maamulaha dugsigaaga maxaliga ah. Dugsiga maxaliga ah ayaa lagu baxshaa si ku saleysan ciwaanka guriga qoyska. Ka fiiri dugsiga maxaliga ah Qariirada Adeegga Helsinki adoo gelinaaya ciwaanka gurigaaga qaybta baarista ee [palvelukartta.hel.fi/en/](https://palvelukartta.hel.fi/en/). Haddii qoyskaagu

u guuro Helsinki kadib marka mudada diiwaan gelintu dhamaato, aadna dooneyso inaad codsato boos cunugaaga laga siiyo waxbarashada luuqada Ingiriiska keliya ama waxbarasho labo luuqadood ah, la xiriir dugsiga ku siinaaya barnaamijyadaan si toos ah.

## 5–16 Febraayo 2024

Maamulaha dugsigu wuxuu ku casuumayaa ardayda mustaqbalka ee fasalka koobaad iyo waalidiinta dhageysi kahor inta aan go'aan rasmi ah laga gaarin waxbarashada baahiyaha gaarka ah iyo marka waxbarashada baahiyaha gaarka ah lagu qorsheynaayo dugsiga baahiyaha gaarka ah, casharka baahiyaha gaarka ah ee waxbarashada qasabka ah ee la dheereeyay, ama casharka baahiyaha gaarka ah ee la taageero.

## Jimcada 8 Maarso 2024

Dugsiga ayaa go'aanka diiwaan gelinta soo dirayaa si loogu soo dhajiyo ciwaanka guriga ardayga. Go'aannada la xiriira taageerada gaarka ah ee casharka baahiyaha gaarka ah ayaa lagu soo dhajin doonaa guriga.

## 11 Maarso–17 Abriil 2024

Mudada codsiga ee shaqooyinka dugsiga kadib. Go'aannada ku aadan shaqooyinka dugsiga kadib ayaa lagu soo dhajin doonaa guryaha biloowga Janaayo 2024. Xog dheeri ah ka akhri [hel.fi/afterschoolactivities](https://hel.fi/afterschoolactivities)

## Axada 31 Maarso 2024

Ku dirista xogta dheeriga ah Asti si ay u diyaariso casharka cunugaaga ayaa la joojinayaa.

## Gu'ga 2024

Dugsiga ayaa abaabulaaya munaasabadaha isbarashada ee ardayda fasalka koobaad ee dayrta 2024. Si aad u hesho xog dheeraad ah, la xiriir dugsiyada oo booqo webseedyadooda.

Taariikhaha iyo fasaxyada mudada dugsiga ee balaaran ee sanad dugsiiyeedka 2024–2025 ayaa lagu soo daabici doonaa dhammaadka sanadka 2023 barta [hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool).

# Sida la iskaga diiwaan gasho dugsiga

Iska diiwaan geli dugsiga qaab elektaroonig ah adoo jooga guriga ama dugsiga. Labo qaab oo dugsiga la iskaga diiwaan gasho:

- Oonlaynka barta asti.hel.fi 8–28 Janaayo 2024 ama
- Inaad booqato dugsiga Arbacada 24 Janaayo 2024 marka ay saacadu tahay 8.00–10.00.

## Diiwaan gelin oonlayn ah

Iska diiwaan geli dugsiga adoo booqanaaya asti.hel.fi inta lagu jiro 8–28 Janaayo 2024. Dugsiga maxaliga ah ee cunugaaga loo qorsheeyay ogeysiiska waxbarashada qasabka ah, kaasoo lagu soo dhajin doonaa ciwaanka guriga cunugaaga bilowga Janaayo 2024. Aalada Asti waxaad ka diiwaan gelin kartaa cunuga dugsiga maxaliga ah luuqada Finish-ka ama luuqada Swedish-ka (Helsinki, carruurta ayaa markasta boos laga siiyaa dugsiga maxaliga ah ee luuqada Finniska iyo Swedish-ka si waafaqsan luuqadooda hooyo).

Aalada Asti waxaad sidoo kale ka diiwaan gelin kartaa cunuga waxbarashada luuqada manhajka ku dhisan ee muusiga, waxbarashada aasaasiga ah ee luuqada Ingiriisiga ah iyo waxbarashada aasaasiga ah ee labada luuqadood, ama inaad boos ka codsato dugsiga aan ahayn dugsiga deegaankaaga sabab kale awgeed, sida suuragalnimada barashada luuqad aan lagu bixin dugsigaaga maxaliga ah.

## Iska diiwaan gelinta dugsiga Arbacada 24 Janaayo

Iska diiwaan gelinta dugsiga ayaa caadiyan lagu sameeyaa oonlayn ahaan adeegga oonlaynka ah ee Asti maalinta Arbacada 24 Janaayo 2024 marka ay saacadu tahay 8.00–10.00. Soo qaado ogeysiiska waxbarashada qasabka ah ee lasoo dhajiyay Janaayo, kaasoo sheegaaya dugsiga maxaliga ah ee ardayga lagu daray oo lagu saleeyay ciwaanka guriga ee ku dul qoran, iyo Aqoonsiga iyo/ama ciwaanka adeegga banka ee oonlaynka ah si looga qaato aqoonsi oonlayn ah. Haddii aad cunugaaga horay uga diiwaan gelisay Asti, uma baahnid inaad dugsiga tagto.

# Helsinki



## Adeegyada Talo bixinta ee Waaxda Waxbarashada

tel. 09 310 44986 Isniinta-Jimcada saacadu markay tahay 10.00–12.00 iyo 13.00–15.00



Ciwaanka wadada: Työpajankatu 8, 00580 Helsinki  
ciwaanka Boostada: PO Box 51300, 00099 City of Helsinki  
switchboard: 09 310 8600 Maalmaha Arbacada 8.15–16.00



[hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool)

## Follow us:



#HelsinkiOppii



@HelsinkiOppii



#HelsinkiOppii



Kasvatus ja koulutus



Kasvatuksen ja koulutuksen  
toimiala  
City of Helsinki

[hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool)

**Publisher:** City of Helsinki's Education Division

**Photographs:** Jefunne Gimpel, Emilia Kangasluoma and Maija Astikainen

**Illustrator:** Riku Ounaslehto

**Printed by** Grano Oy 11/2023

**Information** in this guide was revised in October 2023. We reserve the right to make changes.

**For up-to-date information**, see [hel.fi/welcometoschool](https://hel.fi/welcometoschool) and the school websites.

